# Soo koobida Deeqaha Sinaanta Carruurnimada Hore 2024-2025

## Xaqiiqooyinka Degdega ah ee Deeqaha Sinaanta Carruurnimada Hore 2024-2025

- Deeqaha la bixiyay 2024-2025 waxay dhamaayeen $9.8M.
- DCYF waxay ku bixisay codsiga iyo agabka 6 luqadood: Carabi, Chinese la Fududeeyay, Ingiriisi, Ruush, Soomaali, iyo Isbaanish.
- DCYF waxay ku samaysay hubinta tayada dhammaan codsiyada. DCYF waxay meesha ka saartay codsiyo sababahan soo socda awgood: kuwo aan u qalmin lacagihii loo codsaday ujeedooyinka la diiday awgood, codsiyada aan dhamaystirnayn, iyo codsiyada maalgelinta ee ka baxsan xadka la ogol yahay.
- Deeqaha Sinaanta Carruurnimada Hore 2024-2025 waxa ay maalgelin doontaa 179 codsi, oo wadartoodu dhan tahay $9.8 milyan: 45 ka socda Guryaha Qoyska ee Shatiga leh, 120 ka socda Xarumaha Xannaanada Carruurta, 7 Qandaraaslayaasha ECEAP ah, 3 Kooxaha Ciyaarta iyo Waxbarshada, iyo 4 ka socda Qoyska, Saaxiibka, iyo daryeelayaasha Deriska.
- Maalgelinta waxaa loo isticmaali doonaa: ka hortagga kala saridda jinsiyada ee tallaabada edbinta; kordhinta isticmaalka hab-dhaqannada waxbaridda shucuur-bulsheed ee cilmi-baadhiseed; kordhinta adeegsiga dhaqamada jawaab-celinta dhaqameed iyo luqad ahaan iyo in la yareeyo eexda fasalka; bixiyaan qiimaynta ilmaha ee socota iyo baadhista korriinka; ku xirto qoysaska adeegyada iyo taageerooyinka buuxiya caafimaadka, caafimaadka dhimirka, dhaqaalaha, ama baahiyaha kale; iyo in lagu daro dhaqamada loo wada dhan yahay, ee dhaqan iyo luuqad ahaan taageera iyo dhaqamada khuseeya, ama labadaba qaabaynta barnaamijka waxbarashada hore, gaarsiinta, waxbarashada, tababarka, iyo/ama qiimaynta.
- Maalgelintu waxay u adeegi doontaa 9,125 boosaska shatiga leh, oo lagu daray carruur dheeraad ah oo loo adeego qoyska, saaxiibka, iyo daryeelayaasha deriska, qandaraaslayaasha ECEAP, iyo Kooxaha Ciyaarta iyo Barashada.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Taariikhda asalka ah: Juun 10, 2024
Qaybta Waxbarashada Hore | Qaybinta waxaa oggolaaday Amy Russell, Ku-xigeenka Qaybta waxbarashada Hore

## Hordhac

Deeqda Sinaanta Carruurnimada Hore waxa ay caawisaa taageerada barnaamijyada dhaqan ahaan ka jawaabaya si ay carruurtu u helaan daryeel kala duwan oo buuxinaya baahidooda. Lacagta deeqda ah waa in loo istcimaalaa in lagu daro dhaqamo loo dhan yahay, dhaqan iyo afba taageero iyo dhaqamada khuseeya, ama labadaba qaabaynta barnaamijka waxbarashada hore, gaarsiinta, waxbarashada, tababarka, iyo/ama qiimaynta.

DCYF waxay waydiisatay bixiyeyaasha inay u doortaan mid ka mid ah yoolalka soo socda mashruucooda: ka hortagga ka-joojinta iyo cayrinta; kordhinta isticmaalka hab-dhaqannada waxbaridda shucuur-bulsheed ee cilmi-baadhiseed; kordhinta adeegsiga dhaqamada jawaab-celinta dhaqameed iyo luqad ahaan iyo hoos u dhaca eexda ee fasalka; bixinta qiimaynta ilmaha ee socota iyo baadhista korriinka; ama ku xidhida qoysaska adeega iyo taageerooyinka buuxiya caafimaadka, caafimaadka maskaxda, dhaqaalaha, ama baahiyaha kale. Bixiyeyaasha ayaa sidoo kale awooday in ay cadeeyaan hadafkooda. Ka dib markii ay doorteen yoolka, bixiyeyaasha ayaa sharaxay mashruuc ka caawin doona xaruntooda inay gaarto yoolkaas. Kadib waxay keeneen macluumaadka ku saabsan maalgelinta ay u baahan doonaan si ay u dhamaystiraan mashruucaas.

## Kala saarida Codsiyada

Mudadii codsiga, DCYF waxa ay heshay 790 codsi oo codsanaya in ka badan $43 milyan. Codsiyada waxaa laga baaray xaq u yeelashada DCYF waxay meesha ka saartay codsiyada aan dhamaystirnayn. Codsiyada bixiyeyaasha aan buuxin shuruudaha u-qalmitaanka, ama kuwa codsaday dhaqaale ujeedooyin la diiday, ayaa sidoo kale meesha laga saaray. Codsiyada baaritaanka ka dib, 179 ayaa loo tixgaliyay inay dhameystiran yihiin oo ay xaq u leeyihiin. Sababtoo ah Deeqa Sinnaanta Carruurnimada Hore ee 2024-2025 waxay isku dartay lacag laga soo bilaabo laba sano xisaabtood waxayna lahayd maalgelin dheeraad ah oo hal mar ah oo uu qoondeeyey sharci-dejintu, DCYF waxay awooday inay maalgeliso dhamaan codsiyada xaqa u leh!

## Go'aamada Maalgelinta

DCYF waxa ay awooday in ay maalgeliso 179 codsi, oo wadartoodu dhan tahay $9.8 milyan: 45 ka socda Guryaha Qoyska ee Shatiga leh, 120 ka socda Xarumaha Xannaanada Carruurta, 7 Qandaraaslayaasha ECEAP, 3 ka socda Kooxaha Ciyaarta iyo Barashada, iyo 4 ka socda Qoyska, Saaxiibka, iyo Daryeelayaasha Deriska.

179-ka urur ee la maalgeliyay:

- 179 (100%) waxay u adeegaan carruurta Madaw, Asaliga ah, ama Carruurta Midabka ah
- 62 (35%) waxay u adeegaan carruurta ka diiwaangashan ama u qalma xubinnimada mid ka mid ah 29 qabiil ee federaalku aqoonsan yahay ee Washington
- 77 (43%) waxay u adeegaan carruurta ay haysato guri la'aan ama hooy la'aan
- 135 (75%) waxay u adeegaan carruurta qaata kaalmada Gobolka, qabiilka, ama milatariga

- 74 (41%) waxay u adeegaan carruurta ku jirta meel ka baxsan guriga sababtoo ah ku lug lahaanshaha daryeelka carruurta
- 175 (98%) waxay u adeegaan carruurta kaga hadasha Guriga luqad aan Ingiriisi ahayn.

Kuwa soo socdaa waxay tusayaan tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan yoolalka ay doorteen deeq-bixiyayaashu iyo sida ay u qorsheeyeen inay ku kharash gareeyaan Deeqda:

**Deeq-bixiyeyaashu waxay u doorteen hadafyada soo socda mashaariicdooda:**




**Bixiyeyaasha waxay qorsheynayaan inay gaaraan yoolalkooda iyagoo u isticmaalaya maalgelinta hababka soo socda:**



Deeq-bixiyayaasha waxay ku yaalaan 22 ka mid ah degmooyinka Washington:




## Talaabooyinka Xiga

Laga bilaabo 2024-2025 Deeqaha Sinnaanta Carruurnimada Hore, Codsadayaasha hadda waxaa looga baahan yahay inay ka soo qaybgalaan fadhiga kaalmada farsamo ee gaarka ah ka hor inta aan lacag bixinta la habayn. Codsadeyaashu waxay baran doonaan maaraynta deeqda iyo habka dib u eegista rasiidka DCYF. Tani waxay kaa caawin doontaa in la hubiyo in bixiyayaasha ay fahmaan habka deeqda iyo sharciyada maalgelinta ka hor inta aan lacagta la dirin.

Waxaan filaynaa in Deeqda Sinnaanta Carruurnimada Hore ay mar kale furmi doonto guga 2025.